


Ka shaqeeynta Nadiifiyaha Duwamish

Xaafada Georgetown, iyo qeybaha kale ee Gobolka King, tubooyinka dhulka hoostiisa maraa waxay ku qadaan bullaacadaha iyo biyaha dabeylaho warsharada daweeynta West Point ee ku taala Magnolia si loo nadiifiyo. Tubooyinka iyo warshada daweeynta waxay naga caawiyaan inaad caafimaad qabno iyo sameeynta nadiifinta wabiyada, harooyinka ama waraha iyo Puget Sound.

Inta lagu jiro dabeylaho waa weyne, roob badan ayaa galaya tubooyinka kaddibna siistamka ayaa qaban karaa. Hadda, Xaafada Georgetown, biyaha xad dhaafka ah waxay ku darsamaan bullaacada waxayna ku siidaysa wabiga Duwamish iyada oo biyaha aan la nadiifanin. Tani waxaan ugu yeerna isku darka bullacada xad dhafaka ah ama CSO. CSOs waa badbaadada muhiimka ah oo ku rakiban sistamka bullaacada. Waxay ka hortagan kuu soo noqoshada bullacaada guryaheenada iyo wadooyinkeena Si kastaba ahaatee, CSOs sidoo kale waxay qatar ku tahay deegaanka iyo caafimaadka dadweynaha. Gobolka King waxaa uu ka shaqeynaya yareynta tirada CSOSs ee biyaha degmadeena.

Magaalada George, Gobolka King waxay dhisi doontaa Saldhiga Daweeynta ee cilimada qoyan si ay uga caawiso ilaalinta CSOs wabiga Duwamish. inta lagu jiro waqitiga roobka dabaylaho xoogan, xarunta cusub waxay nadiifin doontaa bullaacada xad dhaafka ah iyo biyaha dabaylaho ka hor tan aysan galin wabiga Duwamish. Xarunta cusub waxay yareyn doontaa tirada biyaha an la nadiifin e galayo wabiga Duwamish booqolkiiib 95.



Dhinca loo doortay saldhiga daweeynta

Gobolka King dhawan waxa uu doortay meesha Saldhiga Daweeynta Qoyan Cimilada ee xaafada George. Meesha waxay ku taala inta u dhaxeysa Koonfur galbeed ee Michigan iyo Wadada koonfur bari iyo Fourth Avenue South. Mesha waxaa loo doortay sababo badan oo jira awadeed.

Waxay u dhawdahay tubooyinka jira ee bullaacada

Waxay ku dhawdahay Wabiga Duwamish Halkaas oo qaaabka cusub Duwamish kuu sii daynto biyaha la nadiifiyay.

Waxay u dhawdahay system-ka bullaacada wabigana waxaa uu qadanaya tubooyinka yar ee dhulka. Tani waxay yareynaysa waqtiga dhismaha iyo carqaladaynta wadada.

Gobolka King waxaa uu soo ibsan doonaa afar hanti si loo helo baahida meesha saldhiga daweeynta. Kooxda xaafadaha ee Gobolka waxay si dhaw ula shaqeeynayaan milkiiladaha hantida si wax loga qabto baahidooda iyo arrimaha kale inta ay socoto siyaasada Gobolka iyo sharciga Gobolka.

Jadwalka Mashruuca

Xarunta hadda ayaa la naqshadeenaya. Kooxda mashruuca waxay sameeyeen go'aanada kuu saaabsan qalabka loo baahanyahay in lagu nadiifiyo biyahah iyo sida dhismayaasha loo dhigayo meesha. Waxaan rajaynaynaa in aan dhammaystirno naqshada horaanta 2017.

Haddii aad xiisanayso inaad wax badan ka barato mashruucan, ama haddii aad rabto inaad la wadaagto fikirkaaga, la xirir Kristine Cramer, Kristine.cramer@kingcounty.gov ama 206-477-5415. Ku reeb fariin lamabrkaaga taleefoonka iyo muuji luqadaada ama u sheeg Kristine luuqada aad ku hadasho. Waxaa lagu siinaya turjumaan lacag la'aan ah.

